

Waan kuugu hambalyeyneynaa helitaanka leysinkaaga G1. Hadda waxaa habboon inaad ka fekerto inaad sameyso tababar ku saabsan darawalnimada. In kastoo uusan ahayn wax la iska rabo oo ku jira imtixaanka waddada ee G1, haddana Wasaaradda Gaadiidka (MTO) ayaa dhaqan-gelisay Koorsada Waxbarashada Darawalnimada Billowga ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad yareso waqtiga aad ku bixiso heerka G1 haddii aad si guul leh ku dhammeystirato Koorso BDE ah oo ay wasaaraddu sharciyeysay oo aad ka dhigatay iskuul leh shatiga MTO iyo macallin darawalnimo. Dhammeystiridda Koorso BDE oo ay wasaaraddu sharciyeysay waxaa laga yaabaa inuu leeyahay qiimo dhimis sicirka caymiska.

Iska hubi inaad doorato iskuul darawalnimo oo sharciyeysan tayona leh. Iskuullada aan haysan shatiga MTO awood uma leh inay tababaraan darawallada G1. Macallimiinta darawalnimada waa inay u shaqeeyaan iskuul leh shatiga darawalnimo ee BDE si ay u tababaraan ardayda G1. Si aad u hesho Iskuul bixin kara koorsada MTO BDE, waxaad:

1. Gal bogga: <http://www.mto.gov.on.ca/english/driver/driving-schools.shtml>
2. Iimayl [Driver.Education@ontario.ca](mailto:Driver.Education@ontario.ca)
3. Haddii aad rabto, codso inaad la kulanto macallimiinta bixinaya casharrada fasalka iyo tababarka gaariga

Xusuusnow, dawaralnimadu waa mudnaan. Nagu caawi in waddooyinka Ontario ay noqdaan kuwa ugu badbaadsan Waqooyiga Ameerika.